مركز الصومال للبحوث ودراسة السياسات

SOMALIA CENTER FOR RESEARCH AND POLICY STUDIES

September -2018

WQ: **Cabdiraxmaan Ciise**

Federaalka Soomaaliya

(Muranka taagan iyo Jirridda Mushkiladda)

Hordhac:

Sanadihii ugu danbeyay Baarlamanka Soomaaliya waxa uu ku guuleystay dhisidda Guddiyo kala duwan, waxa ka mid ah guddiga Xudduudaha iyo Federaleynta oo loo igmaday diyaarinta hab-raaca Federaaleynta dalka. Doodo dheer iyo is-jiidjiid u dhaxeeya dhinacyada siyaasadda kadib ayuu guddigani dhismihiisu surtagalay. Waxa jira laba garab oo ku kala aragti duwan arrinta Federaalka, dhinac taageersan iyo kuwa diiddan, hayeeshee caqabaddu waxay ka jirtaa, labada dhinac midna uma muuqato meel-dhexe oo ay isugu iman karaan. Tanina waxay tusaale cad u tahay sida jilayaasha siyaasadda Soomaalidu ay maankooda uga marantahay aragti siyaasadeed oo qotto-dheer, aan ka ahayn ku loolamidda jagooyinka siyaasadeed ee ku dhisan sadbursiga beelaha iyo kooxeysiga.

Doodda Federaalku waxa ay xoogeysataa markasta oo ay jirto xiisad siyaasadeed oo ka dhalata arrimaha masiiriga, Sida dhameystirka Dastuurka, Qabashada Doorashooyinka...., iyada oo dhinacyada siyaasaddu doodaha dhexdooda mid kasta si hagar La'aan ah u difaaco aragtidiisa ku aadan waxtarka iyo waxyeeladda nimaadamka Federaalka, hase ahaatee dhinacyada diidan iyo kuwa ogal midna iskuma hawlo soobandhigista aragti kale oo la qaadan karo, waxna la isugu keeni karo.

Labada Nidaam ee dawlad-dhexe iyo Federaalku midkoodna ma leh cillad ku gaar ah, cilladdu waxa hadba ka dhalanaysa fahanka iyo qaabka loo fulinayo. Haddii fulinta iyo dhaqangalinta habka Dawlad-dhexd" Centralism" wax ka qaladameen Habaka federaalka isla qaladkii ayaa muuqda. Dawladda Federaalka ee haatan ka jirto Muqdisho waxay u muuqaneysa mid isku koobeysa gacan ku heynta fiilooyinka arrimaha siyaasadda iyo dhaqaalaha, si ka duwan qaabka uu dastuurku qabo oo ah in hawlaha iyo shaqooyinka loo qeybiyo heer Federaal iyo mid Dawlad Goboleed, halka Maamul Goboleedyaduna u muuqdaan kuwa u dhaqmaya sidii Dawlado madax banaan oo kale, iyaga oo degsanaya Siyaasado arrimo dibadeed iyo kuwa gaashaandhig oo mid walba u gaar ah. Arrintaana waxay garab-marsantahayDastuurka iyo Sharciyada Dalka, waxayna khatar ku tahay jiritaanka iyo qaranimada dalka.

Miisaamidda Federaalka

Tan iyo intii uu dalku qaatay nidaamka federaalka 2004 , waxaa meesha ka baxday dawlad dhexe oo awood leh waxaana hadda maamulo awood siyaasdeed leh iyo Xukuumad dhexe; oo ka masuul ah arrimaha gaashaandhigga, siyaasadda arrimaha dibadda,Lacagta ,socdaalka iyo Jinsyadda, sida ku cad dastuurka ku-meel-gaarka ah. Waxaa la odhan

karaa ilaa hadda nidaamka federaalku lama dhaqangelin, markii la eego dhamestir la'aanta xeerarka asaasiga iyo in la iswaafajiyo Axdiyada Maamul Goboleedyada iyo Dastuurka Qaranka; waxa sidoo kale meesha ka maqan in lagu heshiiyo arrimaha dib loo dhigay sida Maqaamka caasimadda, Qeybsiga awoodaha iyo dhismaha maxkamadda Dastuuriga, si loo kala qeexo shaqooyinka.

Si guud haddii loo qeexo nidaamka Federaalku waa hab wada noolaasho bulsho si nabadgelyo ah iyada oo latixgelinyo kala duwanaasha jira, lana ilaalinayo midnimada qaranka. Fedaraalku waa hab ka mid hababka siyaasadeed ee dalalku ku dhaqmaan, kasoo siinaya qeybaha kala gedisan ee ay ka koobantahay dawladda awoodo gaar ah oo ka madax banaan dawladda dhexe, iyaga oo xidhiidhka labada dhinac uu mar waliba ku taaganyahay wadaagista awoodda iyo dhawrista gobanimda dalka. Sidoo kale maamulka arrimaha canshuuraha iyo maalgashiga ayaa lagu maareynaya hab ku dhisan isfahan iyo wadahadal labada dhinac.

Fidditaan nidaamka Federaalka waa mid sii kordhaya ilaa boqolkiiba afartan (40%) dawladaha aduunka ayaa qaatay nidaamkaan, mana jirto dawlad nidaamka federaalka ah ee ay ku dhaqanto uu la mid yahay kuwa kale, hase ahaate waxa jirto sumad guud iyo muuqaal ay ka wada mideysanihiin. Federaalka oo ah nidaam ka soo horjeeda "Centralism" oo ah awooddaha oo hal-meel lagu koobo ayaa wuxuu u kala baxaa qeybahan hoose:

A) Federaal Siyaasadeed:

1. Federaal ku dhisan Iskaashi: habkani awoodaha dawladda dhexe iyo dawlad goboleedyada xubnaha ka ah ayaa aad isugu dhaw. Iyada oo ka qeyb-qaadashada siyaasadeed ee dawlad goboleedyadu ay aad u

sareyso, waxa ayna u marayaan wakiiladooda u matala Federaalka, sida USA iyo Canada.

2. Federaalka Tartan ku dhisan: Habkani dawlad goboleedyada waxa uu siinaya in uu ka dhaxeeyo tartan dhexdooda ah, halka dawladda dhexe ay leedahay kaalin dul-joogteyn iyo isku xidh guud,sida Germany.

3. Federaal ku dhisan Kala Duwani: habkani waa marka ay jirto kala duwanasho bulsho, dhaqan, deegaan, iyo dhaqaale. Kaalinta dawladda dhexe ayaa ah markasta isku heynta dhinacyada iyo xubnaha federaalka, waxaa ka mid ah dalalka nidaamkan ku dhaqma, Ethiopia iyo Spain.

B) Federaal Maamul:

Si toos ah uguma mid ah noocyada Federaalka ah siyaasadeed, hase ahaatee waxa uu awoodo maamul, dhaqaale iyo matalaad ku dhisan deegaan oo buuxda si siman siinayaa gobolada dalka oo idil. Iyada oo wixii siyaasad la xiriira ay maamuleyso dawladda dhexe.

Guud ahaan heer kasta oo uu yahay Federaalka ha noqdo mid siyaasaded ama maamul, awoodaha dawladda dhexe iyo dawlad-goboleedyada ama ismaamulada waxa kala haga waa dastuurka. Kaasoo ah heshiis bulsho oo qeexaya awood qeybsiga siyaasadeed iyo hanaanka shaqo ee hay'adaha dawladda heerarka kala duwan. Dastuurkuna waa ka gedisan yahay arrimaha diinta dhanka isbedalka iyo milgaha maadaamo uu ku dhisanyahay heshiis bulsho oo maareynaya arrimaha siyaasadeed iyo hawlaha shaqo ee dawladeed. Hase ahaatee mabaadiisa waxa sal u ah diinta iyo qiyamka ay rumeysantahay bulshadaas.

Faaidada Federaalka:

Federaalku waxa uu leeyahay faaidooyin badan oo ay ka mid tahay:

- Waxa uu damaanad siinayaa dawlad –goboleedyada xubinta ka ah nidaamka federaalka in ay codkoodu uu leeyahay qiimo.

- Waxa uu isu dheelitiraya awoodaha siyaasadeed isaga oo meesha ka saaraya in koox gaar ah ay ku tagrifasho awoodda dalka.

- Waxa uu ka qeybqaadanaya ilaalinta xuquuqda dhamaan xunaha ku jira midowga

- Waxa uu ka qeybqadanaya koboca dhaqaale isaga oo meesha ka saaraya kala qoqobnaanta u dhaxeysa bulshada.

Ciladaha Federaalka:

Nidaamka federaalku waxa uu leeyahay ceebo waxan ka xusaynaa kuwan:

- Waxa uu u baahnayahay waayo aragnimo iyo awoodo dhaqaale oo aad u balaaran si loo hergaliyo.

- Waxa uu horseedi kara kala qeybsan iyo kala go' dalka.

- Waxa uu horseedi kara isbarbaryaac dhanka xeerarka iyo sharciyada, gaar ahaan marka ay jirto kala duwanaasho dhaqan iyo deegaan.

- Waxa uu xooga saarayaa xoojinta heybta deegaameysiga in ka badan midda qaran.

Federaalku ma ku haboonyahay Soomaaliya?

Dhab ahaantii sida ay qabaan xeel-dheereyaasha xeerka dastuuriga, federaalku waxa uu ku haboon yahay dalka markii ay jirto mid ka mid ah arrimahan soo socda:

1. Dal baaxad weyn
2. Goodi dibadeed
3. Cabsi kala go’
4. Kala duwaansha dhaqan iyo bulsho.

Waxaan halkaan si kooban mid mid u dul istageynaa qodabada kor ku xusan.

1) Dal Baaxad weyn:

Dhab ahaanti Soomaaliya ma aha dal baaxad weyn sida Russia, Canada iyo USA. Hase ahaate ma aha dal yar markii loo eego Switzerland, Belgium iyo UAE oo dhamaantood ah wadamo Federal ah. Sidaasi darted waxa cad in baaxadda deegaanku aysan ahayn mid qasab ka dhigaya ama diidaya Federalka.

2) Gooddi ama Khatar Dibadeed:

Dalka Mareykanka ka hor midowgiisa waxa uu ahaa Ismaamullo hoostga guumeyste, tanina waxa ay dhalisay dareen ah in deegaan kaligii si gooni ah u istaagi kara uusan jiran, iyadoo deegaan kastana uu doonayay madaxbanaanidiisa, arrintaana waxa ay horseedday curashada midowga Gobolada dalkaasi oo dhisay dawlad ballaaran oo hormuud u noqotay nidaamka Federaalka, si ay uga waabtaan khtarta dibadda uga imaan karta.

3) Khatar kala go

Waxa tusaale loo soo qaadan karaa dalalka ay ka jirto khatarta kala qeybsamidda Federaalka dalka Spain iyada oo gobolo ka mid ah dalkaasi gooni isutaag doonayan, sidoo kale waxa tusaale noqon kara xaaladda

hadda ka jirta Soomaaliya iyada maamulada Puntland iyo Soomaaliland oo iyadu doonayso in uu ka go' Soomaaliya inteeda kale, halka Puntland ay ku goodiso xiliyada qaar dib uga fiirsashada ka sii mid ahaanshaha Soomaaliya. Sidaasi darteed dalalka xaaldan oo kale ku jira Federaalku waxa uu noqon karaa xal dhexdhexaad ah.

4) Kala duwanaasho Dhaqan iyo Bulsho:

Federaalada dalalka Switzerland, India iyo Ethiopia ayaa tusaale u ah xaalddaan iyada oo uu nidaamka Federaalku isku hayo dad ku kala duwan diin, dhaqan iyo heybta intuba.

Markii la eego arrimaha kor ku xusan xaaladda Soomaaliya waxa aad ugu dhaw labada arrimood ee ah in jiraan gooddi Dibadeed iyo khatar kala go'. Sidaasi daraadeed nidaamka federalku waxa uu noqon karaa xal ku haboon xaaladda Soomaaliya.

Dawladda Dhexe, Dawlad – Goboleedyada iyo Faragelinta Dibadda

Soomaaliya waxa ay soohdinno la wadaago sadex dale e Jabuuti, Kenya iyo Ethiopia oo dhamaantood ku nool yihiin dad soomaaliyeed. Dhinacyada ka soo horjeeda Federaalka ayaa rumeysan in ay tahay qaab lagu doonayo in Soomaaliya lagu kala qeybiyo iyaga oo xidhiidh taariikh siyasadeed ee aan aadka u wanaagsaneyn ee ka dhexeeya dalalka Ethiopia iyo Soomaaliya , waxayna tusaale u soo qaadanayaan kaalinta ay Ehiopia ku leedahay dhaqangelinta nidaamka Federaalka Soomaaliya. Iyo sidoo kale sooyaalkii siyaasadeed. Iyadoo labada dal uu dhexmaray dagaalo ba'an oo ku salleysan arrinta lahaashada deegaanka Soomaali Galbeed (Ogaden). Waxa sidoo kale xusid mudan faragelinadii military ee

dawladda Ehiopia ka geysatay gudaha soomaliya ayaa sii kordhiyay dareenka xambaarsan gocoshada ee ka jira gudaha soomaaliya.

Dhanka kale waxaa xusid mudan in dawladda Ethiopia oo hadda u muuqata mid u jaheysatay dhan cusub isbedelna uu ku yimid siyaasadeeda, ayaa iyaduna ah dawlad Federal ah oo ka kooban qawmiyado kal duwan, tanina waxa ay meesha ka saareysa shakiga ah in Federalka Soomaaliya mid gadaal laga riixayo.

Docda kale , Kenya oo ah dalka lagu gaaray heshiiska Federaalka 2004 ma aha dal looga bartay in kaalin uu ka ciyaaro arrimaha Gobolka mana aha Dowlad adeegsata Siyaasad faragalineed,taasi oo xoojisay dareenka ay qabaan qaar ka mid ah siyaasiyiinta Soomaaliyeed in Kenya ka duwantahay Siyaasadda Ethiopia ka hor imaashaha Aabii Axmad, inkastoo ay jiraan muranno siyaasadeed oo u dhexeeya Soomaaliaya iyo Kenya oo ay ka mid tahay muranka badda oo horyaala Maxkamadda Cadaaladda Adduunka, sidoo kale darbiga ay Kenya ka dhisayso soohdinta labada dal.

Dhab ahaantii arrinta Federaalku waxa ay mar waliba ahayd doodda ugu badan ee dhinacyada siyaasaddda Soomaaliya u dhexeeysa, waxaa barbar socoto faragelin dibadeed oo dadka rumeysanyihiin in ay ka qeybqaadatay xaaladda siyaasadeed ee murugsan ee ka jirta Soomaaliya iyo khlilafaadka u dhaxeeya labada dhinac ee dawladda dhexe iyo maamulada.

Somaaliya waa dal uu gaaray burbur aad u culus una nugul dhibaatooyinka, ma xamili karo isjiidjiid siyasadeed, iyada la tixgelinayo isbedelka dhuleed iyo kan siyaasadeed ee buburku sababay sanadihii burburku taagnaa ka dib dhiciddii taliskii milletriga ee uu hogaaminayay Muxamad Siyaad Barre.

Federaal Qabiil ama Federaal Qaran

Nidaamka Federaalku doodiisu waxa ay taagantahay ilaa 2004kii, walina dhinac uma dhicin waxaa uga sii daray arrinta awoodqeybsiga siyasadeed ee loo yaqaano (4.5) kasoo ah hab qeybsi ku dhisan sadbursi beeleed iyo cadaalad darro. Bulsho reer guuraa ah oo nidaamka dawladnimada aan u lahayn waayo aagnimo xeeldheer ayaa nidaamkani gacanta loo galiyay, tanina waxa ay abuurtay jahawareer baahsan iyo is qabqabsai siyaasadeed oo dhamaad lahayn.

Xudunta dhibta (Mushkiladda)

Dhabtii hirgalinta Federaalka ama ka tagistiisa ma aha dhibaatada dalka Sommaliaya, arrintu waxa ay tahay rabitaanka kooxaha siyaasadda ma yihiin kuwa ay ka go'antahay xal ka gaarista iyo katalinta aayaha dalka iyo in kale. Nidaamka Federaalka ah waxa la qaatay 2004kii, dhibaatada siyaasadeedna waa ay ka horreysay mudadaa walina waa mid sii jirta, haddii Federalku yahay dhibaatada waa maxay sababta xal loo gaari waayay muddaa ka hor? Hadiise Federaalku xal yahay maxaa loo heli waayay nabad iyo daganaan siyaasadeed markii la hergaliyay ka dib?

Hadaba, dhab ahaan Federaalku waa mid ka mid agabka loo adeegsan karo dhismaha dawladnimada Soomaaliya, ka tagitaankiisuna waa mid aysan ku xirnayn xal u helidda dhibatooyinka dalka oo idil.

Ugu danbeyn, Federaalku waa xaalad jirta haatan lagana gudbi karo haddii ay muuqato in uusan dan u ahayn dalka, sidaasi darted waxa haboon in aan waqti badan lagu lumin arrin aan jirrid u ahayn dhibaatada ka jirta dalka, waa in la abaaro lagana shaqeeyo xal ka gaarista mushkilada Soomaaliya iyada oo laga faaideysanyo taagerada caalamiga ah.